Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee Cishaha iyo Subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Salaadaha ugu culus munaafiqiinta waa labada salaadood ee Cishaha iyo Subaxa, hadayse ogaan lahaayeen waxa ku jira ee fadligooda ah waxay ku imaan lahaayeen gurguurasho, waxaan ku hamiyey in Salaada la aqiimo oo aan u diro nin Jamaacada tujiya, Aniguna intaan kaxaysto Rag Xaabo xirmooyina wata oo aan la aadno Qolada aan Salaada imaanin oo aanu guryahooda ku Gubno.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Munaafiqiinta iyo ka caga jiidkooda iyo karahsigooda Salaadaha, gaar ahaana labada Salaadood ee Cishaha iyo Subaxa, haday ogaan lahaayeen ajarka iyo fadliga ku jira Salaadahaa oo Jamac lagula tukado Muslimiinta way imaan lahaayeen xataa iyagoo sida caruurta ku gur-guuranaya gacmaha iyo jilbaha. Nabigu nabadgelyo iyo naxarasiis Allaha siiyee wuxuu go'aansaday inuu amro in Salaadda la aqiimo, oo nin dadka ka mida imaam u noqdo oo dadka tujiyo, isaguna intuu kaxaysto kuwo Xaabo sida ay aadaan Raga aan Salaada jamaca imaanayn oo uu guryahooda dab ku soo gubo, waayo waxay sameeyeen ee dambi ah awgeed laakiin muuna samayn, dadka Guryaha jooga ee Dumar, Caruur aan dambi lahayn, iyo dad cudur-daar leh dambina aan lahayn dartood ayuuna sidaa u samayn.

https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3366